

## DOMESTIC VIOLENCE AND ABUSE

**Caawimada xagga deganaanshaha**  
Waxaa jira dumar doonaya caawimo  
ama inay ka baxsadan nin ku xadgudba  
laakiin ka welwelsan sida ay taasi u  
saamaynayo inay UK joogaan.  
Refugee Women of Bristol wax kasta  
xal uma helayso laakiin waanu ku  
dhegaysanaynaa xaalad kasta oo Aad ku  
jirto kadibna waxaanu kaa caawinaynaa  
inaad doorato taageerada kugu haboon.  
Waxaanu dumarka qaxootiga ah u  
qabanaa kullamo furan oo bilaash ah oo  
ay dumarku iman karaan – xaaladkasta  
oo ay ku suganyihiinba.

Kullamadan waxaanu qabanaa maalin  
kasta oo Talaadada ah 10:00  
subbaxnimo ilaa 3:00 galabnimo  
xilliyada iskuuladu furan yihiin. Goobta  
kullamadu waa;

Malcolm X Centre  
City Road, St Paul's,  
Bristol BS2 8YH



Shula Soleman

## DOMESTIC VIOLENCE AND ABUSE

**Sida aad caawimo ku helayso**  
Haddaad noogu timaado kullamada ay  
**Refugee Women of Bristol** qabato  
Talaadada

- Waanu ku dhegaysnaynaa waxay  
doontu xaaladaadu ha ahaatee.
- Waanu ku rumaysanaynaa
- Xaaladaada sababteeda  
xukumimayo
- Waxaanu kaala talinaynaa  
adeegyada aad helikarto.
- Wuxuu aad noo sheegto cidkale  
uma gudbinayno

### Refugee Women of Bristol:

0117 941 5867  
[info@refugeewomenofbristol.org.uk](mailto:info@refugeewomenofbristol.org.uk)  
[www.refugeewomenofbristol.org.uk](http://www.refugeewomenofbristol.org.uk)

**Bristol Domestic Abuse Helpline:** 0800  
6949 999 (24hr)

**SARSAS:** (rape and sexual abuse  
support) 0808 801 0456


**Victim Support Line:** 0845 3030 900

**Bristol Against Violence and Abuse:**  
(support services) [www.bava.org.uk](http://www.bava.org.uk)  
**Haddii aad adigaiyo carrurtaadu  
khatar hadda ku jirtaan wac 999**

## DOMESTIC VIOLENCE AND ABUSE



**Refugee Women of Bristol**



**Aan ka hadalno xadgudubka iyo  
waxyeelada qoyska dhexdiisa**



**NHS  
Bristol**

**SOMALI**

**Waxaad helaysaa turjumaad afkaaga**

## DOMESTIC VIOLENCE AND ABUSE



"Qofkastaa wuxuu ninkayga u yaqaanaa qof wanaagsan. Waxay yidhaahdaan wuxuu kuula dhaqmaa sidii aad tahay ina boqor. Wuxuu i siiyaa dahab waxkastana isaga aya bixiya. Wuxuu yidhaahdaa uma baahnid inaad lacag qaadatid. Isaga aya meelkasta i geeya. Wuxuu yidhaahdaa uma baahnid inaad baabuur wadida barato. Markasta wuu ila soo hadlaa oo i waydiyyaa inaan wax u baahanahay. Waxaan jecelahay inaan waxbarto laakiin wuxuu iyidhaahdaa waxaa carruurta u wanaagsan inaad guriga joogto. Waxkastana isagaa go'aamiya. Waaan ismoodaa sida shimbir meelku xidhan".



### Waa maxay waxyeelada iyo xadgudubyada qoysku?

Sheekada kor ku qorani waa hal tusaale oo ka mid ah xadgudubyada qoyska dhexdiisa. Xadgudubka iyo waxyeelada qoyaska dhexdiisu waa marka uu qof kantaroolo noloshaada ee ku xadgudbo dareenkaaga, jidhkaaga, galmaada ama dhaqaalaha, Qofka xadgudubka gaysanaya wuxuu noqonkaraa ninkaaga, saaxiibkaa, ilmahaaga ama qof kale oo qoyskaaga ka tirsan. Dumarka UK ku nool afartiiba mid ka mid ah aya xadgudubyo kala kulanta qoyskeeda. Haddii aad ka baqdo ninkaaga waxay u badantahay in xadgudub qoys ku haysto.

### Dhibaato ku haysa ha ka aamusnaan

## DOMESTIC VIOLENCE AND ABUSE

### Waxaan doonayey inaan caawimo doonto laakiin .....

*Ma joogi  
karaa  
UK?*

*Carruurta  
miyay iga  
qaadanayaan?*

*Aniga  
khaladkayga  
miyaa?*

*Maxay dadku ii  
malayn  
doonaan?*



Haddaunu nahay Refugee Women of Bristol waanu fahmaynaa welwelkaaga. Xadgudubka qoyskaaga kaaga yimaadaa marna khalad aad leedahay maaha, wuxuuna saamaynkaraa caafimaadka jidhkaaga iyo maskaxdaada. Waad nala hadlikartaa; bogga dambe ka eego warbixin dheeraad ah'

## DOMESTIC VIOLENCE AND ABUSE

### Ma ogtahay?

In 30% ka mid ah xadgudubyada qoyska dhexdiisa ahi bilawdaan mudada ay dumarku uurka leeyiin. Xadgudubyada qoysku waxay carruurta dhinac xun ka tusaan xidhiidhka dadka waawayn taas oo saamaynkarta waxbarashadooda. Waaanu kaa caawinkarnaa sidii aad adiga iyo carruurtaadu taageero u helilahaydeen.

Dumarka la kulmay xadgudub iyo waxyelo qoys ee Bristol ku nooli waxay 2012 caawimo soo doonteen 1553 jeer. Waxaa telefoonka caawimada la soo wacay 4719 jeer. Adiguna caawimo waad helikartaa.

### Xuquuqdaada

Sharciga UK ragga iyo dumarku way siman yihiin. Dumarku waxay xaq u leeyihiin adeegyo, shaqo, caawimo, hooy iyo waxbarasho ta ragga la mid ah.

Haddii Visa xaas uu ninkaagu kugu keenay oo aad joogtay laba sano ama wax ka yar oo ay xadgudubyo qoys ku haystaan waxaad codsankartaa **indefinite leave to remain** adiga oo aan ninkaagu ku taageerahayn.

Xadgudubyada iyo waxyeelada qoysku waa dambi. Booliska ayaadiga iyo carruurtaada idin caawinaya hadaad la xidhiidho.